

Daryeelka Carruurta Ee Qoyska	Hagaha Kaqaybqaataha Kormeerka Firfircoon: Bulshooyinka Kala Duwan ee Minnesota
Qaybtan labada saacadood ah waxay buuxinaysaa shuruuda tababarka Xeerka 2 ee tababarka kormeerka. La Cusboonaysiiyay 2/2024	2 Saacadood

Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha ka dhalanaya

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:

DHS.Child.Care@state.mn.us

Guudmarka Casharka

Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

Qaybta Nuxurka KCF: VII.B. Xaqiijinta Badbaadada

Aagga Maadada CDA: Qorshaynta deegaan waxbarasho oo badbaado ah, oo caafimaad qaba.

Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka tababarkan, kaqaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Qeex heerarka ruqsad bixinta ee Xeerka 2 aad ee Minnesota Department of Human Services (MN DHS, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota) ee ku aadan kormeerka goobaha daryeelka carruurta ee qoyska.
- Qiimeeyaan oo ka hadal filashooyinka kormeerka si aad ugu babac dhigto farsamooyinka shaqsiga ah iyo kuwa dhaqanka.
- Abuuraan qorshe gaar ah si aad u raacdo farsamooyinka kormeerka firfircoon.

Ujeedooyinka Waxbarashada waa in dib loogu eegaa bilowga kulan kasta oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

Guudmarka Casharka

Wakhtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbaridda
30 daqiiqo	Soo dhawayn iyo hordhacyo Qeexitaanka kormeerka	Dooda kooxda ballaaran Hal Abuurka kooxda ballaaran
20 daqiiqo	Tilmaamaha Khatarka Dhaawaca, Heerka Kobaca, iyo Kahortaga	Hawsha koox yar Dooda kooxda ballaaran Fikir ka dhiibashada webseedka
30 daqiiqo	Sharciyada iyo xeerarka kormeerka	Khudbo yar Milicsiga shakhsi ahaaneed
25 daqiiqo	Adeegsiga Aqoonta iyo Waxbarashada – Marxaladaha Kormeerka	Hawsha koox yar Dooda kooxda ballaaran
15 daqiiqo	Dib u eegista higsiyada/gabo-gabada - Abuurista goobta daryeelka carruurta ee qoyska ee badqabka leh, ee la kormeero.	Howlaha dib u milicsiga shakhsi ahaaneed Lammaanin iyo wax wadaagis
Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood		

Qeexitaanka Kormeerka Daryeelka Carruurta ee Qoyska

Minnesota DHS Xeerka 2 (9502.0315, qayb-hoosaadda 29a) wuxuu kormeer ku qeexayaa:

"Kormeer" micnihiisu waa daryeel-bixiyaha oo joogaya meel uu **ka arko ama ka maqlo** dhallaanka, ilmaha socod baradka ah, ama daryeelka dhigta mar walba si daryeel-bixiyuhu uu u awoodo inuu wax ka qabto ilaalinta caafimaadka iyo badqabka cunugga. Cunugga gaaray da'da dugsiga, macneheedu waa daryeel-bixiyaha oo heegan u ah inuu caawiyo oo uu daryeelo si caafimaadka iyo badbaadada cunugga loo ilaaliyo."

Liinkiyada Shati-bixinta iyo Qawaaniinta

- [Xeer 2 ee MN ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)
- [Qawaaniinta Minnesota, Cutubka 142B – Xeerka Shati-siinta Adeegyada Aadanaha](#)
- [Macluumaadka iyo Foomamka Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)
- [Liiska Hubinta Kormeerka Shati-siinta Daryeelka Carruurta ee Qoyska \(ELICI\)](#)
- [Shuruudaha daryeel bixiyaasha kaydka beddelka ah iyo kuwa beddelka degdegga ah ee daryeelka carruurta ee qoyska](#)
- [Xaashida Baaritaanka Taariikhda bixiyaasha daryeelka carruurta ee Qoyska](#)
- [Bogga xogta ee Baaritaanada Taariikhda bixiyaasha daryeelka carruurta ee Minnesota](#)

Ilaha Caafimaadka iyo Badbaadada

- [Tilmaamaha Lagu Ilaaliyo Badbaadada Carruurta: Hagaha Koritaanka](#)
- [Keeping Kids Safe: Hagaha Qorshaynta Xaaladaha Degdegga ah ee bixiyaasha daryeelka carruurta](#)
- [Xogta Centers for Disease Control and Prevention \(CDC, Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada\) ee ku Qoran Luuqado aan Ahayn Ingiriis](#)
- [American Academy of Pediatrics: Buug Tusmeedyada Lagu Saleeyay Luuqadooda](#)

Ilo Xirfadeed oo Dheeraad ah

- [Caring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Qaranka, Tilmaamaha Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurta](#)
- [Xeerka Anshaxa ee National Association for the Education of Young Children \(NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar\) iyo Bayaanka Ballanqaadka](#)
- [Center for Inclusive Child Care \(CICC\)](#)

Buug Tusmeedka Heerarka Kobaca, Khatarta Dhaawaca, iyo Tilmaamaha Kahortaga

Da'da	Sifooyinka	Khatarta Dhaawaca	Tilmaamaha Kahortaga
Dhalasha da ilaa 3 bilood jir	• Wuu cunaa, seexdaa, ooyaa • Wuxuu leeyahay wax nuugis adag. • Wuxuu bilaabaa inuu qab qabsado uuna isrogo si lama filaan ah • Wuxuu u baahan yahay taageerada madaxa iyo qoorta	• Wuxuu kasoo dhacaa kursiga fadhiga, miisaska, miisaska dhar badelidda ama sariiraha • Wuu ku gubtaa dareereyaasha kulul • Mergashada iyo neef ku istaagidda • SUID (Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha) • Waxyeellada ka Dhalata Jugta madaxa Loo Geysto	• Marka ilmaha dhashay keligood ha uga tagin sariiraha, miisaska dhar badelashada, kursiga fadhiga, kuraasta ama goobaha kale ee dhulka ka qaadan. • Markasta hubi heerkulka biyaha kahor inta aadan u qubayn ilmaha dhashay. Ka xir heerkulka tuubada biyaha kulul heer ka hooseeya 120° F. • Soo xiro ganbaleellada qiiqa iyo aaladaha sheega kaarboon monoxide-ka. Tijaabi baytariga labo jeer sanadkii. • Ka fogee alaabaha yaryar iyo boonbaleyaasha ilmaha. • Ugu seexi ilmaha dhabar-dhabar sariir badqab la xaqiijiyay leh, joodari adag oo lagu goglay go' si fiican ugu dhagan, adiga oo aan waxba saarayn sariirta ilmaha marka laga reebo ilmaha iyo cinjirka ilmaha oo qalalan. • Ha u adeegsan busteyaala ama gogol jilicsan aaga hurdada ee ilmaha. • Weligaa ha ruxin ilmo, xataa adoo la ciyaaraaya. • Kuraasta fadhiga loo ogolaaday ilmaha waa in si sax ah loogu rakibaa kursiga danbe ee u jeeda gadaasha gaariga lana adeegsadaa.
4 ilaa 6 bilood jir	• Wuu fariistaa marka la siiyo taageerada ugu yar • Wuxuu ku ciyaara gacmo furan • Wuxuu laacaa alaabaha • Wuxuu bilaabaa inuu waxyaabaha afka gashto • Wuxuu qaab sii kordhaaya hami ugu qabaa aagaga ku xeeran • Wuxuu doonaayaa inuu tijaabsho, dhadhamiyo, taabto, uuna ruxo alaabta	• Dhaawaca qofka saaran gaariga • Dhicitaannada • Wuu ku gubtaa dareereyaasha kulul • Mergashada iyo neef ku istaagidda • SUID (Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha) • Waxyeellada ka Dhalata Jugta madaxa Loo Geysto	• Marka ilmaha dhashay keligood ha uga tagin sariiraha, miisaska dhar badelashada, kursiga fadhiga, kuraasta ama goobaha kale ee dhulka ka qaadan. • Markasta hubi heerkulka biyaha kahor inta aadan u qubayn ilmaha dhashay ama dhaqin gacmaha ama qaybaha kale ee jidhka. Ka xir heerkulka tuubada biyaha kulul heer ka hooseeya 120° F. • Soo xiro ganbaleellada qiiqa iyo aaladaha sheega kaarboon monoxide-ka. Tijaabi baytariga labo jeer sanadkii. • Ka fogee alaabaha yaryar iyo boonbaleyaasha ilmaha oo bar ilmaha waawayn in aysan ku ciyaarin alaabaha yaryar ama boonbaleyaasha agta ilmaha dhashay. • Ugu seexi ilmaha dhabar-dhabar sariir badqab la xaqiijiyay leh, joodari adag oo lagu goglay go' si fiican ugu dhagan, adiga oo aan waxba saarayn sariirta ilmaha marka laga reebo ilmaha iyo cinjirka ilmaha oo qalalan. • Ha u adeegsan busteyaala ama gogol jilicsan aaga hurdada ee ilmaha. • Markasta joog meel aad ka gaarto ilmaha marka aad ilmaha u seexo dhabar-dhabar "wakhtiga jiifka dhabar-dhabara." • Weligaa ha ruxin ilmo, xataa adoo la ciyaaraaya.
7 ilaa 12 bilood	• Keligiis ayuu fariistaa • Aad ayuu hami ugu qabaa wax kasta • Wuu gurguurtaa • Wuxuu bilaabaa inuu socdo • Wuxuu sahamiyaa aaga u dhow aagaga u dhowdhow • Wuu jiidaa alaabaha • Wuxuu jecel yahay inuu aado banaanka • Wuxuu koobi gareeyaa dadka kale iyo dadka waawayn • Wuxuu bilaabaa inuu cuno cuntada adag	• Dhaawaca qofka saaran gaariga • Dhicitaannada • Wuu ku gubtaa dareereyaasha iyo dusha meelaha kulul • Mergashada iyo neef ku istaagidda • SUID (Dhimashada Degdega ah ee Lama filaanka ah ee Ilmaha) • Waxyeellada ka Dhalata Jugta madaxa Loo Geysto	• Xaqiiji in aad aragto ilmaha dhaqdhaqaaqaaya markasta adiga oo si taxadar leh u nidamainaaya bii'adiisa. • Albaabo ayaa laga doonayaa in lagu xiro dhammaan jaranjarooyinka marka ilmaha jira 6-18 bilood ay joogaan. • Hal gacan ku hay ilmaha yar marka uu saaran yahay miiska dhar badelida. • Xaqiiji in keliya agabka saxda ah uu gaari karo. • Ha adeegsan aaladaha socodka iyo qalabka kale ee nooca socodka oo kale ah. • Ka fogee cuntooyinka iyo dareereyaasha kulul carruurta. • Saar difaacyo aagaga shoocaac bixiyaasha, tuubooyinka kulul, iyo oogooyinka kale ee kulul. • Raac xeerarka hurdada badqabka leh iyo talooyinka. • Marna ilmo keligiis ha uga tagin gudaha ama aaga biyaha, ayna ku jiraan baafafka, musqulaha, saladaha, barkadaha dabaasha ama biyo quusida, ama qasacyada kale ee biyaha, xataa dhawr sikin gudahood. • Weligaa ha ruxin ilmo, xataa adoo la ciyaaraaya.

Da'da	Sifooyinka	Khatarta Dhaawaca	Tilmaamaha Kahortaga
1 iyo 2 sano jir	• Wuxuu jecel yahay inuu degdeg u socdo • Waa mid aan xasiloonaayn • Wuxuu iskudayaa inuu laaco alaabta • Wuu ordaa • Wuxuu kor iyo hoos ugu socdaa jaranjarooyinka • Wuxuu jecel yahay inuu wax koro • Wuxuu riixaa uuna jiidaa alaabaha • Wuxuu furi karaa albaabada, qaanadaha, albaabada iyo daaqadaha • Wuxuu tuuraa kubadaha iyo alaabaha kale • Wuxuu bilaabaa inuu hadlo, laakiin ma sheegi karo baahiyihiisa	• Dhaawacyada gaariga matoorka • Dhicitaannada • Gubashooyinka • Sumoobidda • Saxashada • Biyo ku qarqoomidda • Xadgudubka ilmaha	• Albaabo ayaa laga doonayaa in lagu xiro dhammaan jaranjarooyinka marka ilmaha jira 6-18 bilood ay joogaan. Marka ay kobac ahaan diyaar yihiin, tusi ilmaha sida loo koro loogana soo degto jaranjarooyinka. • Kasaar alaabta guriga ee caarada leh aagaga aadka loo isticmaalo. • U jeedi ganaha gadaasha shoolada marka aad cunto karinayso. Bar ilmaha yaryar macnaha erayga "kulayl." • Ka foguee fiilooyinka korontada meelaha ilmuhu gaaraan. • Adeegso joojiyaasha shooga ama alaabta si aad u daboosho bareysyadaha aan la adeegsan. • Kaydi alaabaha guriga sida nadiifiyaasha kiimikooyinka, daawooyinka, iyo alaabaha la isku qurxiyo meelo sareeya iyo qaano xiran. • Iska ilaali inaad siiso ilmaha lawska, qaloonka, khudaarta ceeriin iyo cuntooyinka kale ee dhuunta u istaagi kara. • Boonbaleyaasha waa inaysan lahayn qaybo yaryar. • Markasta si taxadar leh u kormeer; marna ilmo keligiis ha uga tagin gudaha ama aaga biyo, xataa dhawr sikin. • Hubi badqabka saxgada iyo aagaga la gaari karo si aad uga eegto waxyaabaha ilmuhu liqi karaan.
3 iyo 4 sano jir	• Wuxuu bilaabaa inuu sameeyo dookhyo • Wuxuu leeyahay awood badan • Wuxuu oggolaansho iyo dareen ka raadsadaa dadka waawayn	• Dhaawacyada wadada • Gubashooyinka • Aaga wadada • Sunta • Qalabka iyo agabka	• Samee hubinnada badqabka qalabka iyo goobta ciyaarta. • Carruurt waxay ku ciyaarayaan qalabka da' ahaan iyo miisaan ahaanba ku habboon. • Dusha hoosta iyo aaga qalabka ciyaarta waa inay tahay mid jilicsan oo cantaruuq ah. Adeegso agabka sida gaarka ah loogu ansixiyay in loo adeegsado goobta. • Hubi in ilmuhu u labisan yahay si sax ah si looga ilaaliyo ceegada (tusaale, waa inaysan lahayn xargo shaarka, jaakadaha, iwm.). • Geli alaabta guriga, daawooyinka, iyo waxyaabaha la isku qurxiyo meel aysan arki karin ilmuhu. • Bar ilmaha farqiga u dhexeeya alaabaha cuntada ah iyo kuwa aan cuntada ahayn, iyo waxa aan ku habboonayn in la cuno. • Si taxadar leh u ilaali ilmaha inta lagu jiro mashruucyada farshaxanka iyo dhoobo samaynta si aysan aka u gashan riinjiga, buraashyada, dhoobada, iyo agabka kale. Adeegso alaabaha aan sunta ahayn. • Geli alaabta beerta, maqasyada, iyo mindiyaha afaysan meel aysan gaarin. • Bar ilmaha adeegsiga badqabka leh ee qalabka iyo alaabaha kale oo si taxadar leh u kormeer marka ay adeegsanayaan.
5 sano iyo ka wayn	• Waa mid xoog badan • Wuxuu jecel yahay inuu eego xaafada • Wuxuu codsan doonaa xog • Wuxuu raadsan doonaa saaxiibo uu la ciyaaro • Wuxuu ka qaybgalaa ciyaaraha • Wuxuu qorsheeyaa uuna fuliyaa fikradaha	• Dhaawacyada wadada • Gubashooyinka • Aaga wadada • Qoryaha	• Bar dadka wadada maraaya iyo xeerarka badqabka wadooyinka. • Ilmaha waawayn waa inay xidhaan suumanka badqabka. Dadka waawayn waa inay tusaale u noqdaan sharciyada badqabka ayna markasta xidhaan suunta amaanka marka ay ku sahfrayaan gaariga. • Markasta adeegso koofiyadaha amaanka xataa marka la adeegsanaayo baaskiilada taayirada tababarka ama baaskiilada saddex lugoodka. • Bar ilmaha sida loo tuuro oo loo duubo haddii dharkooda uu dab qabsado. • Sii tababarka dabka si ilmuhu u noqdaan kuwo yaqaana jidka lagugu baxsado iyo codka ganbaleelka qiiqa. • Ka foguee taraqyada iyo qarxisooyinka carruurta. Bar inuu taraqyada uu helay u keeno dadka waawayn. • Samee hubinnada badqabka qalabka iyo goobta ciyaarta • Carruurta waa inay ku ciyaaraan qalabka da' ahaan iyo miisaan ahaanba ku habboon. • Dusha hoosta iyo aaga qalabka ciyaarta waa inay tahay mid jilicsan oo cantaruuq ah. Adeegso agabka sida gaarka ah loogu ansixiyay in loo adeegsado goobta. • Bar ilmaha xeerarka ciyaarta oo ku dhiiri geli ilmaha inuu boonbaleyaasha meel dhigo kadib ciyaarta. • Ku xir qoryaha iyo rasaaska meelo kala duwan oo aysan gaarin carruurta.

Liiska Hubinta Badqabka iyo Kormeerka ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska

Agabka Muhiimka u ah Kormeerka Badqabka Iagu Saleeyay Xeerka 2 ee MN DHS	Had iyo jeer	Mararka qaarkood	Marna	Fiiro Gaar Ah
Waxaan raacaa heerka isku aadka ilmaha iyo dadka waawayn ee ku cad xajmiga ruqsadeyda.				
Caawiyahayga ayaa jira ugu yaraan 13 sano laakiin ka yar 18 sano.				
Waxaan joogaa meel aan uga jeedo ama ka maqlaayo ilmaha dhashay, socod baradka, iyo ilmaha dugsiga daryeelka waxaana awoodaa in aan soo faro geliyo markasta.				
Ruqsada ayaa ku soo baxday magacayga, waana joogaa marka carruurtu joogaan.				
Waan ogahay in aan sharciyan masuul ka ahay badqabka carruurta.				
Waxaan maray baarista taariikhda.				
Dhammaan dadka ku nool gurigayga ee jira 13 sano ama ka wayn ayaa maray baarista taariikhda, sida laga doonaayo.				
Waxaan maray baaritaanka jidhka, waxaana jir ahaan leeyahay caafimaad aan ku daryeeli karo carruurta.				
Waan ogahay dhammaan dadka waawayn ee guriga, ayna ku jiraan aniga, lagana dooni karo inay maraan baaritaanka jirka, caafimaadka dhimirka ama ku tiirsanaanta kiimikada haddii ruqsad bixihaygu iga doonaayo.				
Bii'adeyda ayaa ku baastay kormeerka badqabka.				
Waxaan adeegsadaa tusmada badqabka wanaagsan. Ciqaabta jireed (qanjaruufada, laadista, qaniinyada, dharbaaxada, dhago jiidista, timo rifida, ruxidda, ama u maamulida si qalafsan) waa in aysan dhicin.				
Xadgudubka shucuurta (naynaas ugu yeeridda, faalooyinka cayda ah, ceebaynta, ama hanjabaadaha) ayaan dhicin.				
Uma diido cuntada, diiranaanta, dharka, iyo daryeelka caafimaadka sabab ciqaabeed awgeed.				
Ma siiyo ilmaha wakhtiga banaanka oo ka badan 10 daqiiqo waxaana awoodaa in aan soo faro geliyo marka ilmuhu uu banaanka jiro.				
Carruurta ayaa jooga meel aan uga jeedo ama ka maqlaayo xataa marka ay banaanka joogaan.				
Kuma ciqaabo ilmaha dhacdooyinka musqusha.				
Carruurta ayaa hela wakhtiyada ciyaarta ee banaanka iyo gudaha maalin kasta, marka cimiladu saamaxayso.				
Goobta, qalabka, iyo agabka ayaa ah kuwo nadiif ah oo xaalad wanaagsan ku jira.				

Waan kormeeraa carruurta agagaarka barkadaha dabaasha waxaana haystaa dukumiintiga la iga rabo.				
Waxaan kormeeraa carruurta oo jooga deegaanka, beeraha raada iyo xeebaha, gaar ahaana markay khatarta biyaha u dhow yihiin. Waxaan haystaa warqadaha ogolaanshaha ee dhammaan carruurta oo diwaanka iigu jira.				
Waxaan la shaqeeyaa ruqsad bixihayga si aan u go'aansho tallaabooyinka habboon si loo xaqiijiyo in carruurtu aysan gelin biyaha loona kormeero si sax ah.				
Waxaan ku xiraa albaabo jaranjarooyinka marka carruurta u dhexeeya da'aha 6 iyo 18 bilood ay joogaan.				
Bii'adu waxay leedahay dhammaan agabka badqabka ee loogu baahan yahay dabka, bulaacada, korontada.				
Ma jiro qof sigaar ku caba marka ay ilmuhu joogaan.				
Ganbaleelada dabka ayaan daarnayn mana geli karaan carruurtu. Rasaasta iyo qoryaha in lagu xareeyaa qaanado xiran oo kala gaar ah.				
Agabka khatarta ah sida mindiyaha, taraqyada, bacaha caaga ah, iyo qalabka, ayaa laga fogeeyaa meelaha ay gaaraan ilmuhu.				
Agabka sunta ah (saabuunaha, oomada, geedaha sunta ah, cabitaannada khamrada, daawada, riinjiga, iyo kiimikooyinka kale) ma gaari karaan carruurtu.				
Waalidiinta ayaa u ogolaaday carruurtooda inay ku ciyaaraan xayawaannadayda rabaayadda ah ayadoo lagu kormeeraayo dhammaan xayawaanadeyda rabaayada ahna waa la talaalay.				
Carruurta xafaayada xidha ayaa lagu ilaaliyaa nadiif iyo qalayl.				
Dhammaan carruurta ayaa fursado u hela nashaadaadka kobaca ku habboon ee baxnaaninta leh oo badqab leh.				
Waxaan raacaa qorshaha waxbarashada ee lagu baxsho waxbarashada gaarka ah ee dhallaanka si aan u daryeelo ilmaha naafada ah.				
Marka aan seexiyo ilmaha, waxaan markasta u seexshaa dhabar-dhabar.				
Ma jiro waxa yaala aaga hurdada ee ilmaha, marka laga reebo go' si adag ugu dhagan joodariga iyo cinjirka ilmuhu nuugo oo qalalan. Meelaha ilmuhu seexdaan ayaan lahayn sariir jilicsan, xayawaanka boonbalaha ah, ama busteyaal.				
Carruurta ayaa si joogto ah u farxasha.				
Waaladiinta ayaa la wargeliyaa isla markaba marka ilmahoodu la xanuunsan yahay qandho, matag, shuban, ama finan.				
Ilmaha waxaa soo qaada keliya waalidiintooda ama qof oggolaansho ka haysta waalidiinta.				
Waxaan ku hayaa ilmaha gudaha aaga ruqsadda leh ee barnaamijka daryeelka carruurta ee qoyska.				

Qorshahayga Badqabka iyo Kormeerka

Dib u eeg qoraalkaaga liiska hubinta ee dhammaan agabka aad uga jawaabtay **markasta**. Hambalyo! Waxaad raacaysaa farsamooyinka kormeerka wanaagsan ee aagagaan!

Hadda, eeg meelaha aad uga jawaabtay **mararka qaar** ama **marna**. Kuwaani waa aagag u baahan tallaabo.

Ku qor alaabahaan liiskaaga. Kuwaan ayaa noqon doona yoolalkaaga qorshahaaga badqabka iyo kormeerka. Haddii aadan haysan agabka ku qoran mararka qaar ama marna, qor shan tallaabo oo aad qaadi doonto si aad kor ugu qaado badqabka iyo kormeerka ee carruurka ku jira daryeelkaaga carruurta. Ku calaamadee bokiska marka aad dhamaystirto yoolkaaga.

1. _____

☐

2. _____

☐

3. _____

☐

4. _____

☐

5. _____

☐

Waxyaabaha aan doonaayo in aan ka xasuusto casharkaan: